


Saamaynta dhaqaale ee COVID-19 iyo walaacyada ugu waaweyn ee maciishada ay ka qabaan qoysaska Soomaaliyeed


Sanadkaan, Qaramada Midoobay waxay qiyaastay in 4.1 milyan oo Soomaali ah ay hayso raashin yari, 2.6 milyan ay gudaha dalka ku barakaceen, saddex qeybood qeybna dadka aysan heli karin biyo ku filan. Helitaan la'aanta cunno iyo maciishad waxaa dadka badankiisu u arkaa dhibaato ka weyn oo ka degdeg badan COVID-19, ayadoo xannibaadaha dhaqdhaqaaqa iyo isdhimidda fursadaha loogu talagalay dhakhli abuurka ay saamayn ba'an kuyeelanayaan dhaqaalah qoyska. Daraasad dallada Nexus ay samaysay waxaa ay muujinaysaa xaalada dhaqaale ee aadka u daran ee ay wajaheen badi qoysaska Soomaaliyeed, waxaana ay ishaaraysaa in qoysaska ay qasab ku noqon karto inay sameeyaan isu dheelitirka kala doorashada waxyaabo ay u wada baahan yihiin oo iska soo horjeeda dhaqaalaha oo xadidan dartii, gaar ahaan markay timaado soo gadashada quutul daruuriga iyo biyaha, baddalkii badbaadada ka dhanka ah coronavirus ayadoo la adeegsanayo in la soo gato saabuunta gacmaha lagu dhaqdo, maaskareyaasha sanko iyo afka lagu daboolo, iyo qalab kale oo shakhsi isku badbaadin karo.




Biyo yari




Deymo/deymaha oo aan la awoodin in la bixiyo




Keyd la'aan/ qarash la'aan



Shaqada oo qofka laga eryo/in la heli waayo dakhli mustaqbalka dhow



Mushaarka oo yar/ shaqo la'aan



Helitaan la'aanta raashinka



■ Qaranka ■ Barakacayaal ■ Miyi ■ Magaalo

Macluumaadka baaritaanka oo lasoo uruurshay Juun-Luulyo 2020